

Xanaanadeena caruurta (kiindaha) waxay ka qayb qaadanaysaa Barnaamijka Luqadda Carruurnimada Hore ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Tababark Fiktooriya!

### **Waa maxay sababta barashada luqadda aan Ingiriisiga ahayn muhiim ugu tahay ilmahayga?**

Khabiirada waxbarashada ayaa ogaaday inay jiraan faa'iidooyin badan oo ay u leeyihiin dhalinyarada barashada luqado dheeraada, kuwaas oo ay ku jiraan ka caawinta ilmahaaga si ay u fekeru, u sahamiyo una xalliyo una taageero barashadooda akhrinta iyo qorista hore.

Barashada luqad kale waxay siineysaa ilmahaaga faham dheeraad ah oo ku saabsan sida luqadaha u shaqeeyaan. Haddii ilmahaagu horayba ugu fiicnaa luqadda la keeno, wuxuu xoojin karaa kalsoonidiisa iyo aqoonsigiisa dhaqameed.

Iyada oo lagu dhiirigelinayo xirfadaha luqadaha kala duwan ee xanaanada caruurta, dadka reer Fiktooriya waxay dhisi karaan bulshooyin deegaan oo xoog leh waxayna u diyaarin karaan carruurta duni caalami ah oo isku xiran.

### **Miyay barashada luqad kale ay saamayn ku leedahay horumarka luqadda Ingiriisiga ee ilmahayga?**

Barashada luqad kale waxay ka caawisaa ilmahaaga inuu hagaajiyo akhris-qoraalka guud oo uu fahmo sida luqaddu guud u shaqeyso.

Haddii aad uga hadasho luqad aan Ingiriisiga ahayn guriga, waxay ka caawineysaa carruurta inay horumariyaan xirfadahooda luqadeed guud ahaan.

### **Sidee loo bari doonaa barnaamijka?**

Ilmahaagu wuxuu sii wadi doonaa in lagu dhiirigeliyo inuu barto iyadoo loo marayo sahaminta, xallinta dhibaataada iyo barashada luqad kale.

Carruurta waxay wax ku baran doonaan habka barista ula kac ah, kor u qaadida fahamka ficilkooda, iyaga oo ku dhex jira ciyaar, farshaxan, muusig iyo sheekooyin, iyo inay kordhiyaan eraybixijntooda.

Isticmaalka luqada ayaa sidoo kale lagu dari doonaa barashada maalinlaha ah iyo dhaqdhaqaaqyada, siinta carruurta fursado balaaran oo ay u adeegsadaan luqadahooda.

### **Sidee ayaa luqaddan loo doortay?**

Xulashada luqada ay tahay in wax lagu barayo waxaa hoggaamiyay bulshooyinka, danaha Kindaha xanaanada caruurta iyo helitaanka shaqaale tayo leh iyo xaaladaha qaarkood, si loo sii wado joogtaynta barashada luqadda ee dugsiya hoose.

Kindaha Xanaanada Caruurta waxay ku siin doontaa macluumaad joogto ah oo ku saabsan barnaamijka iyo dadka xiiseynaya, iyo sidoo kale fursad ay ku isticmaalaan luqada guriga.